



Maamulayaasha Harriet Tubman, Roseway Heights waxay diyaar u yihiin halganka furitaanka labo dugsi dhexe oo cusub

Iyada oo Dugsiyada Dadweynaha Portland ay isku diyaarinayaan furitaanka Harriet Tubman iyo Roseway Heights, maamulayaasha dugsiyada dhexe ayaa hawl sare wada iyaga oo xaqiijinaya in wax kastaa diyaar u yihiin bilowga sanad dugsiyeedka 2018-19-ka. Iyada oo ay jiraan kulamo badan oo bulshadu leedahay, isku-duba ridka 26 waaxood oo degmada gudaheeda ku yaala iyo qorshayaasa kale ee furitaanka dugsiyada, Natasha Butler oo ka socota Harriet Tubman iyo Kathleen Ellwood oo ka socota Roseway Height ayaa ah gacmaha degan ee hawsha wada iyada oo bartanka lagaga jiro duufaanka shaqo.

“Waan ku faraxsanahay oo waxaan rumaysanahay in tani ay noqon doonto isbedel weyn oo bulshada loogu talagalay,” ayay sheegtay Butler. “Waxaan haysanaa fursad aan ku abuurno bulsho dugsi oo awood leh oo dhaqamo kala duwan leh, iyo meel guud ahaan bulshada loogu talagalay.”

Butler waayo-aragnimadeeda waxbarasho ee hore waa mid ballaaran. Ka hor intii aan Harriet Tubman loo magacaabin maamulaha qorshaynta, waxay maamule ka ahayd Open Meadow (oo hada ah Dugsi Furan) oo ku yaala Portland, kaaliyaha maamulaha oo ay ka soo noqotay Dugsiga Martin Luther King Jr. iyo kaaliyaha maamulaha wax hagaajinta oo ay ka soo noqotay Dugsiga Hoose ee Margaret Scott. Waxay sidoo kale guddoomiye waaxeed ka soo noqotay Jaamacadda Bulshada ee Portland, agaasimaha waxbarashada oo ay ka soo noqotay SEI Academy, agaasimaha taageerada qalin-jabinta oo ay ka soo noqotay St. Andrew Nativity School, iyo agaasimaha waxbarashada oo ay ka soo noqotay Dugsiga Sare ee De La Salle North Catholic. Waxay sidoo kale macallin ka soo ahayd Dugsiyada Dhexe ee Whitaker iyo Beaumont.

Bulshooyinka dugsiyada ee soo geli doona Harriet Tubman -- Boise-Eliot/Humboldt, Irvington, Martin Luther King, Jr. iyo Sabin -- ayaa furitaanka dugsiyada cusub rajeynayay muddo ka badan hal sano.

“Dhammaan afarta bulshooyinkayga dugsiyada laga kala imaanayo aad ayay ii taageereen aniga, waxayna ii fidiyeen taageero iyada oo tani hore u sii socoto,” ayay sheegtay Butler. “Taageeradu waxay ahayd mid naxariis leh, waxaanan ku faraxsanahay in aan dugsi dhexe ka bilaabo degaanka Waqooyi-Waqooyi bari.”

Butler waxay shahaadadeeda B.S. ee Xiriirka Hadalka iyo Master-ta Waxbarashada ka qaadatay Jaamacadda Gobolka Portland, iyada oo Master-ta Maamulka ka qaadatay Jaamacadda Portland. Waayo-aragnimadeeda ay u leedahay aasaasida iyo ilaalinta barnaamijyada tacliimeed; ee horumarinta iyo fududeynta heerka manhaj oo ku habboon oo loogu talagalay barnaamijyada tacliimeed ee dadweynaha iyo kuwa gaarka ah; iyo horumarinta goobaha tababar ee loogu talagalay macallimiinta iyo manhajka ee fasallada ayaa iyada ka dhigay in ay si fiican ugu diyaar garawdo hawsha ku soo aadan.

Ellwood si taasi la mid ah ayay ugu diyaar garawday waxayna ku faraxsan tahay nidaamka furitaanka Roseway Heights. Waxay ku soo biirtay Dugsiyada Dadweynaha Portland iyada oo ahayd tababaraha waxka qabashada iyo taageerada, ka dibna waxay kaaliyaha maamulaha iyo maamulaha ka soo noqotay Dugsiga Hoose ee Irvington. Waxay 19-keedii sano ee ugu horreysay ee waxbarashada ku bixisay Dugsiyada Middoobey ee degmada Long Beach ee ku yaala California, halkaasi oo ay soo qabatay doorar kala duwan oo ah wax baridda iyo maamulka.

“Ilaa iyo hada nidaamka diyaarinta furitaanka Roseway Heights wuxuu u socdaa si wanaagsan,” ayay sheegtay Ellwood. “Muhiimada koowaad hada waa dhisida bulshada. Wax yar ayaanu ka duwan nahay Harriet Tubman taasi oo ah in bulshooyinkayga dugsiga laga kala imaanayo ay ku jiraan marxalado bilow ah in ay isku yimaadaan. Waan ku kalsoonahay in waqtiga aan furno Agoosto, in ardayda, waalidiinta iyo macallimiintu ay yeelan doonaan dareen bulsho marka la eego Roseway Heights.”

Vestal, Lee, Scott and Rose City Park waxay noqon doonaan dugsiyada laga kala imaanayo ee soo geli doona Roseway Heights. Vestal, Lee iyo Scott waa dugsiyada Title I oo leh arday badan oo kala duwan. Ellwood khibrada ballaaran ee ay leedahay dugsiyada dhexe iyo waayo-aragnimada ay u leedahay wax baridda dugsiyada Title I ayaa siiyay faham cad oo la xiriira ardaydeeda mustaqbalka. Waxay xiriir la samaynaysaa ururada bulshada sida Hay’ada Bulshada ee Muhaajirka iyo Qoxootiga iyo Hacienda House si ay ardayda soo galeysa iyo waalidiinta uga caawiso in ay dareemaan soo dhaweyn isla markaana lagu wargeliyo nidaamka, iyo si ay u hesho fikradooda ku saabsan sida bulshada dugsiga looga dhigo mid loo dhan yahay isla markaana ah u noqoto meel soo dhaweyn leh.

“Waxaanu sidoo kale kulamo ku qabaneynaa dugsiyada laga kala imaanayo anaga oo la shaqaynayna Dugsiga Sare ee Madison, si ardaydaasi soo galeysaa uu midba midka kale barto, iyo ugu dambayntii in ay abuuraan bulsho weyn oo Madison leeyahay, sababtoo ah ardaydani waxay soo geli doonaan Madison,” ayay sheegtay.

Ellwood hada waa musharax sugaysa shahaadeeda u sareysa ee ‘doctoral’ oo ay ka qaadato Concordia University. Waxay shahaadadeeda M.A. ee Maamulka Waxbarashada ka qaadatay Concordia, iyada oo shahaadadeeda B.A. ee Taariikhda iyo Waxbarashada Cilmiga Bulshada ee Dugsiga Sare ka qaadatay Niagara University.

Si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato nidaamka degmada ee furitaanka Harriet Tubman iyo Roseway Heights, booqo boggeena internetka ee [Qorshaynta Dugsiga Dhexe](#)

-Pamela Jordan